



Hennepin County

Doorashooyinka Hagaha Codbixiyaha

Soo dhawoow

Kooxda Doorashooyinka Hennepin County waxay ku dadaalaan inay kuugu adeegaan si daacadnimo, hufnaan iyo saxnaan leh. Marka aad codkaaga dhiibato, waxaad ka dhigaysaa codkaaga mid la maqlo, waxaad la xisaabtameysaa masuuliyiinta la doortay, waxaadna saameyn ku yeelataa arrimaha muhiimka ah ee taabanaya bulshadaada.

Hagahan codbixiyaha wuxuu sharxayaa hanaanka loo sameeyo codbixinta, wuxuuna ku siinayaa macluumaad iyo agab kaa caawinaya inaad noqoto codbixiye xog-ogaal ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, fadlan la xirii xafiiskeena.

Waad ku mahadsan tahay inaad ka qaybqaadato dimuqraadiyaddeenna!

Si daacadnimo leh,

Ginny Gelms
Agaasimaha Waaxda Doorashooyinka

Liiska mawduucyada

Cida codeyn karto	4
Xuquuqaha Codbixiyaha	5
Liiska hubinta codbixinta	6
Isdiwaangelinta si aad u codeyso	7
Qaababka la isku diwaangeliyo.....	8
Dammaanashada Codbixiyaha	9
Siyaabaha loo codeeyo	10
Waxa ku qoran warqaddaada codbixinta	10
Marin helida.....	14
Duruufaha gaarka ah	15
Jagooyinka La Soo Doorto.....	16
Inaad noqotid codbixiye xog-ogaal ah.....	20
Sida Loo Calaamadeeyo Warqadda Codbixinta	21
Ka qaybqaado	23



Cida codeyn karto

Waxaad codkaaga ka dhiiban kartaa Minnesota haddii aad buuxiso dhammaan shuruudaha soo socda:

- Inaad tahay muwaadin Maraykan ah
- Ugu yaraan inaad jirto 18 sano Maalinta Doorashada
- Inaad tahay qof deganaa Minnesota ugu yaraan 20 maalmood
- Inaad tahay qof aanan hadda loo xirin xukun danbi culus
- In garsooruhu uusan kaala noqonin xaq aad u leedahay inaad codayso iyadoo lagu ilaalinayo



Xuquuqaha codbixiyaha

Adiga oo ah codbixiye ku sugan gobolka Minnesota, waxaad leedahay xuquuqo badan! Xusuusnow in aan lagaa hor istaagi karin xaqaaga codbixinta haddii aad u qalanto inaad cod bixiso.

Waxaad xaq uleedahay inaad:

- Codbixiso, iska diiwaangeliso codbixinta, ama qof kale ka caawiso isdiiwaangelinta codbixinta adigoona ku samaynin wax faragelin ah.
- Codsato caawimaad haddii aad u baahato
- Caawimaad ka hesho garsoore doorasho ama aad soo kaxaysato qof ku caawiya
- Codbixiso marka aad dhamaysato muddada xabsiga ee laguugu xukumay dembi culus
- Fasax ka qaadata shaqada si aad u codbixiso adoon lumin mushaharkaaga, fasaxaaga gaarka ah, ama fasaxaaga sannadlaha ah
- La timaaddo warqad tusaale ah oo codbixin goobta codbixinta
- Hesho warqad codbixin oo cusub haddii aad khalad ka gasho warqaddaada codbixinta ka hor intaadan dhiiban codkaaga
- Codbixiso haddii aad safka codbixinta ku jirto ugu dambayn saacadda 8 p.m. Maalinta Doorashada
- Carruurtaada kula imaadaan goobta codbixinta
- Iska diiwaangeliso codbixinta Maalinta Doorashada adigoo wata dukumeentiyada looga baahan yahay ee caddaynaya goobta aad deggen tahay. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isdiiwaangelinta Maalinta Doorashada waxaad ka heli kartaa bogga 8



Liiska hubinta codbixinta

Codbixintu marka ugu horreysa waxay u muuqan kartaa mid adag ama cabsi leh, laakiin waxaan halkan u joognaa inaan kaa caawinno hanaanka codbixinta oo dhan.

Isticmaal liiskan hubinta iyo hagaha codbixiyaha si codbixintu kuugu noqoto mid sahlan sannadkan!

Isu diyaari inaad codbixiso

☐ Hubi inaad u qalanto codbixinta (bogga 4)

☐ Iska diiwaangeli codbixinta (bogga 7)

☐ Ogow waxa ku qoran warqaddaada codbixinta (bogga 10)

☐ Samee Qorshahaaga Codbixinta:

Waxaan ku codayn doonaa boostada (bogga 11)

AMA

Waxaan ku codayn doonaa si qof ahaan ah doorashada hordhaca ah (bogga 12)

AMA

Waxaan codayn doonaa Maalinta Doorashada (bogga 13)

☐ Codee!



Isdiwaangelinta si aad u codeyso

Waa inaad isdiwaangelisaa ka hor intaadan codayn.

Isdiwaangelintu waa hab lagu caddeeyo inaad u qalanto codbixinta.

- Gobolka Minnesota, waxaad horey iskugu diiwaangelin kartaa muddo dhan 21 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.
- Waxa kale oo aad isdiwaangelin kartaa marka aad si qof ahaan xilli hore u codaynayso ama Maalinta Doorashada, adigoo ka faa'iidsanaya adeegga isdiwaangelinta isla maalintaas.



Ma hubtaid miyaa inaad isdiwaangelisay?
Ka fiiri barta mnvotes.gov/register

Qaababka la isku diwaangeliyo

Iska diwaangeli onlayn barta mnvotes.gov/register

- Habkan waxaad u baahan tahay inaad haysato cinwaan iimayl ah.

Isku diiwaangelinta warqad

- Ka daabaco foomka codsiga isdiwaangelinta barta mnvotes.gov/register ama barta hennepincounty.gov
- Ku dir boosto ama gacanta ku geey
Xafiiska Doorashooyinka Hennepin County:
300 South 6th Street - MC 680, Minneapolis MN 55487

Isku diwaangelinta qof ahaan

- Waa inaad keentaa dukumentii caddeynaya:
 - qofka aad tahay; iyo
 - meesha aad degan tahay
 - *Tusaale ahaan, aqoonsiga Minnesota ee hadda oona shaqaynaya ama laysinka darawalnimada*
- Liiska dhammaan dukumeentiyada loo aqbalo caddeynta degnaanshaha waxaad ka heli kartaa barta mnvotes.gov/register

AMA

- Waxaad codsan kartaa in codbixiye ka diiwaangashan deegaankaaga codbixinta uu dammaanad kaa noqdo (*Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dammaanad-qaadista ka eeg bogga 9*)

Xusuusnow inaad cusboonaysiiso diiwaangelintaada marka:

- Aad u guurto guri cusub
- Aad beddesho magacaaga
- Aadan codeynin ugu yaraan hal mar afartii sano ee u dambaysay

Ardayda Kulliyadaha

Isku diiwaangeli adigoo isticmaalaya cinwaanka aad hadda u tixgeliso inuu yahay gurigaaga. Tusaale ahaan, wuxuu noqon karaa hoyga ardayda, guriga aad ka deggen tahay meel ka baxsan kambaaska ama guriga waalidkaa.



Dammaanashada Codbixiyaha

Haddii aadan haysan dukumeenti sax ah oo caddeynaya cinwaanka aad hadda degan tahay, qof kale ayaa dammaanad kaa noqon kara marka aad si toos ah goobta codbixinta uga codaynayso.

Qofka dammaanada kaa noqonaya waa inuu saxiixo dhaar uu ku xaqiijinayo guriga aad degan tahay.

Yaa damiin kaa noqon kara?

- Codbixiye diiwaangashan oo deggan isla deegaanka codbixinta ee aad ka codaynayso
(Hal codbixiye diiwaangashan wuxuu dammaanad qaadi karaa ugu badnaan siddeed codbixiye)

AMA

- Xubin ka tirsan shaqaalaha xarun deegaan haddii aad ku nooshahay xarun noocaas ah
- Shaqaaluhu waa inay goobta codbixinta ku soo bandhigaan caddeyn muujinaysa inay halkaas ka shaqeeyaan (*tusaale ahaan, kaarka aqoonsiga shaqaalaha ama liiska shaqaalaha*)

Shaqaalaha xarunta deegaanku waxay dammaanad qaadi karaan dhammaan codbixiyeyaasha u qalma ee ku nool xaruntaas.

Haddii qof damiin kaa noqday, adiguna ma dammaanad qaadi kartid qof kale.

Ogsoonow: Haddii ciwaankaaga aan la xaqiijin karin, waxaa laga yaabaa in "lagugu carqaladeeyo" goobaha codbixinta. Weli waad awoodaa inaad codeyso. Garsoorayaasha doorashada goobta codbixinta ayaa kaa qaadi doona dhaar xaqiijinaysa inaad u qalanto codbixinta ka hor intaadan codka dhiiban.



Siyaabaha loo codeeyo

Gobolka Minnesota, dhammaan codbixiyeyaasha xaq u leh codbixinta waxay dooran karaan mid ka mid ah hababkan:

Inay codkooda hore ugu diraan boostada (*bogga 11*)

ama

Inay codkooda hore ugu dhiibtan goob codbixin (*bogga 12*)

ama

Inay codeeyaan Maalinta Doorashada (*bogga 13*)

Waxa ku qoran warqaddaada codbixintu way isbeddelaan sannad kasta, waxayna ku xiran yihiin goobta aad deggan tahay.



Ka hor intaadan u bixin codbixinta, waxaa muhiim ah inaad baadhitaam ku soo samayso musharraxiinta iyo su'aalaha ku qornaan doono warqaddaada codbixinta.

mnvotes.gov/myballot

Xilli hore ku dir codkaaga boostada


Ku codaynta boostada waa hab sahlan oo ku habboon. Uma baahnid inaad guriga ka baxdo, mana jirto saf aad galayso.

Tallaabooyinka:

1. Isdiiwaangeli si aad u codeyso (*bogga 7*)
2. Ka codso in laguugu soo diro boostada warqadda codbixinta maqnaanshaha doorashada barta mnvotes.gov/absentee_ama_hennepincounty.gov/elections
3. Waxaad boostada ku heli doontaa warqaddaada codbixinta
4. Buuxi warqaddaada codbixinta
 - Si taxaddar leh u akhri tilmaamaha ku lifaaqan
 - Saxiixa markhaati ayaa looga baahan yahay cod-bixiye ama nootaayo diiwaangashan
 - Waxaad heli doontaa foom diiwaangelin dheeraad ah si aad u buuxiso haddii aadan xilli hore is diwaangelinin
5. Ku celi warqaddaada codbixinta adigoo ku diraya boostada ama adigoo shakhsi ahaan u geynaya
 - Boosto ahaan: Warqaddaada codbixinta waa inay soo gaadhaa ugu dambayn Maalinta Doorashada
 - Qof ahaan: Waa inaad warqadda codbixinta soo celisaa ugu dambayn 5 p.m. Maalinta Doorashada

Waxaad la socon kartaa halka ay marayso warqaddaada codbixinta adigoo booqanaya barta mnvotes.gov/track

Haddii aad wax dhibaato ah kala kulanto warqaddaada codbixinta, la xiriir Xafiiska Doorashooyinka Hennepin County adigoo wacaya 612-348-5151 ama iimayl u diraya hc.vote@hennepin.us






Xilli hore si qof ahaan

Waxaad ka codayn kartaa xafiiska doorashooyinka ee deegaankaaga ama goobta loogu talagalay codbixinta hordhaca ah, ilaa 46 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.


Tallaabooyinka:

1. Xilli hore isdiiwaangelisay ama isdiiwaangelisay marka aad codkaaga dhiibanayso (*bogga 7*)
 - Haddii aad hore isu diiwaangelisay, looma baahna inaad keento aqoonsi.
 - Haddii aad isdiiwaangelinayso marka aad timaaddo goobta codbixinta, hubi inaad keento caddayn sax ah oo muujinaysa meesha aad degan tahay
2. Ka raadi goobaha codbixinta hordhaca ah iyo saacadaha ay furan yihiin barta hennepincounty.gov/elections
 - Xusuusnow in muddada sugitaanku ay ku kala duwanaa karaan goobaha codbixinta
3. Kahor intaadan helin warqadda codbixinta, waxaad buuxin doontaa foomka codsiga warqada codbixinta maqnaanshaha
4. Codee!
 - Waxaad codkaaga ku dhiiban doontaa meel gaar ah
 - Waxaad xaq u leedahay inaad codsato caawimaad ama aad hesho warqad cusub oo codbixin haddii aad khalad samayso.

Buuxi warqadda codbixinta



Gali warqada codbixinta





Maalinta Doorashada


Maalinta Doorashadu waa maalin muhiim ah oo aad codkaaga ku dhiiban karto, goobtaada codbixintuna badanaa waxay ku taallaa meel u dhow gurigaaga.

Tallaabooyinka:


1. Xilli hore isdiwaangeli ama isdiwaangeli marka aad codkaaga dhiibanayso (*bogga 7*)
 - Haddii aad hore isu diwaangelisay, looma baahna inaad keento aqoonsi.
 - Haddii aad isdiwaangelinayso Maalinta Doorashada, hubi inaad keento caddayn sax ah oo muujinaysa meesha aad degan tahay
2. Ka hel goobtaada codbixinta barta mnvotes.gov/pollfinder
 - Xusuusnow in muddada sugitaanku ay ku kala duwanaa karaan goobaha codbixinta
 - Codbixintu waxay furan tahay 7 a.m. ilaa 8 p.m. Maalinta Doorashada
3. Codee!
 - Waxaad codkaaga ku dhiiban doontaa meel gaar ah
 - Waxaad xaq u leedahay inaad codsato caawimaad ama aad hesho warqad cusub oo codbixin haddii aad khalad samayso

Haddii aad safka ku jirto 8 p.m., waxaa lagu oggolaan doonaa inaad codayso.

Buuxi warqadda codbixinta



Gali warqada codbixinta





Marin helida

- Goobaha codbixinta waxaa waajib ku ah inay noqdaan kuwo ay si fudud u isticmaali karaan dhammaan codbixiyeyaashu, oo ay ku jiraan dadka naafada ah.
- Codbixiyuhu wuxuu soo kaxaysan karaa saaxiib, xubin qoyska ka tirsan, ama qof kasta oo kale si uu uga caawiyo codbixinta, marka laga reebo loo-shaqeeyihiisa ama wakiilka ururka shaqaalaha.
- Codbixiyuhu wuxuu kaloo codsan karaa caawimada garsoore doorasho.

Helitaanka tignoolajiyada lagu codeeyo

Goob kasta oo codbixin ah waxaa yaal qalabka ExpressVote (qalab lagu calaamadeeyo warqadda codbixinta oo loogu talagalay dadka naafada ah), kaas oo u oggolaanaya qof kasta inuu si madax-bannaan oo qarsoodi ah u calaamadeeyo warqaddiisa codbixinta isaga oo aan isticmaalin qalin.

Qalabku wuxuu leeyahay shaashad soo bandhigi karta warqadda codbixinta oo lagu muujin karo far waaweyn ama asal leh kala-duwanaansho midab oo sareeya si ay u sahlanaato akhriskeedu. Waxa kale oo uu kuugu akhrin karaa warqadda codbixinta adigoo adeegsanaya samaacado.

Codbixiyeyaashu waxay doorashadooda ku calaamadayn karaan shaashad la taaban karo ama keyboodhka dadka indhoolaha.

Codbixinta adigoo gaarigaaga ku jira

Garsoorayaasha doorashadu waxay kaa caawin karaan inaad codkaaga dhiibato adigoo gaarigaaga ku jirto haddii aanay kuu sahlanaayn inaad ka soo degto gaariga. Laba garsoore doorasho ayaa kuugu iman doona iyagoo wata dukumeentiyada u baahan saxiixaaga iyo warqadda codbixinta. Marka aad dhammayso calaamadaynta warqadda codbixinta, waxay warqadda codbixinta ku ridi doonaan sanduuqa codadka.

Duruufaha gaarka ah

Codeynta adigoo hoy la'aan ah

Haddii aad buuxiso shuruudaha codbixinta, waxaad xaq u leedahay inaad codeyso iyadoon loo eegin xaaladdaada hoy. Marka aad isdiiwaangelinayso, hubi inaad isticmaasho cinwaanka aad hadda ku sugan tahay (*tusaale ahaan, hoyga ku-meel-gaarka ah, guriga saaxiibkaa, meel bannaanka ah, iwm.*)

Haddii aad degan tahay meel bannaanka ah, ku qor labada waddo ee isgoyska ah ee kuugu dhow iyo sharaxaad ka bixinaysa meesha aad seexato (*tusaale ahaan, geeska koonfur-galbeedka Loring Park, agagaarka isgoyska Hennepin Ave. iyo Oak Grove St.*).

Haddii aadan haysan dukumeenti sax ah oo ku saabsan deganaanshahaaga hadda, waxaad heli kartaa qof ku xaqiijiyo Maalinta Doorashada. Qofka kuu dammaanad qaadaya waa inuu deggan yahay isla xaafadda codbixinta ee aad ka codeynayso, waana inuu dhaar ku caddeeyo inuu si shakhsi ah u og yahay inaad deggan tahay guriga aad sheegtay (*bogga 9*).

Codbixinta adigoo leh diiwaan dembiyeed

Diiwaankaaga dembiyeed saamayn kuma yeelanayo xaq aad u leedahay inaad ka codeyso gobolka Minnesota, haddii aanad hadda ku jirin xabsi adigoo ku xukuman dembi culus. Mar haddii aadan wax xabsi ah aadan ku jirin, xaqaaga codbixinta ayaa si toos ah dib kuugu soo noqonaya.

Safe at Home

Safe at Home waa barnaamij ka jiro gobalka oo dhan si loogu caawiyo dadka u baqaya ammaankooda inay haystaan ciwaan qarsoodi ah.

Haddii aad ka qaybqaadato barnaamijka Safe at Home, fadlan booqo websaydka barnaamijka Safe at Home, sos.mn.gov/safe-at-home si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo codeeyo. Waxa kale oo aad wici kartaa lambarka Safe at Home: 1-866-723-3035.



Jagooyinka la soo doorto

Xafisyada federaalka

Madaxweyne: Waa madaxa Dowladda Maraykanka. Wuxuu saxiixaa hindise-sharciyeedyada uu ansixiyo Kongareeska Maraykanka si ay u noqdaan sharci, ama wuu diidi karaa. Madaxweynaha ayaa mas'uul ka ah hirgelinta iyo dhaqangelinta sharciyada uu dejiyo Kongareesku. Sidoo kale, wuxuu magacaabaa madaxda in ka badan 50 guddi oo federaal ah oo madaxbannaan, wuxuuna soo saari karaa amarro fulineed. Madaxweynaha ayaa magacaaba garsoorayaasha Maxkamadda Sare ee Maraykanka, kuwaas oo Kongareesku ansixiyo. Madaxweynaha sidoo kale waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka. Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka waxay xilka hayaan muddo afar sano ah, mana qaban karaan xilka wax ka badan laba muddo-xileed. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Madaxweyne ku-xigeenka: Waajibaadka ugu muhiimsan ee madaxweyne ku-xigeenka waa inuu diyaar u ahaado inuu qabto xilka madaxweynaha haddii madaxweynuhu awoodi waayo inuu gudan karo waajibaadkiisa. Madaxweyne ku-xigeenku sidoo kale waa guddoomiyaha Golaha Guurtida Maraykanka, wuxuuna dhiibaa codka go'aamiya natiijada marka codadku isla ekaadaan. Waxa kale oo uu si rasmi ah u guddoomiyaa qaabilaadda iyo tirinta codadka Golaha Doorashada Madaxweynaha. Madaxweyne ku-xigeenku wuxuu la tartamaa madaxweynaha isagoo kula jira tigidhka doorashada, sidaas darteed hal cod ayaad ugu codaynaysaa labadoodaba. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Xildhibaanka aqalka sare ee Maraykanka: Golaha guurtida waa mid ka mid ah labada aqal ee Kongareeska Maraykanka. Waxaa jira 100 xildhibaan oo aqalka sare ah, iyadoo gobol kasta uu leeyahay laba xildhibaan. Xildhibaanada aqalka sare ee Maraykanka waxay soo jeediyaan, ka doodaan, oo u codeeyaan hindise-sharciyeedyada. Waxay sidoo kale kormeeraan miisaaniyadda federaalka, waxayna ansixiyaan ama diidaan dadka uu soo magacaabo madaxweynaha. Golaha guurtidu wuxuu leeyahay awood gaar ah oo uu ku ansixiyo ama ku diido

heshiisyada lala galo dowladaha shisheeye, iyadoo looga baahan yahay xubnaha codka saddex meelood laba meel. Xildhibaanadu waxay xilka hayaan muddo lix sano ah. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Wakiilka Maraykanka: Aqalka Wakiilladu waa aqalka labaad ee Kongareeska Maraykanka. 435 wakiilada Mareykanka, tiradoodana waxaa lagu saleeyaa tirada dadka ku nool gobol kasta, waxaana dib loo qaybiyaa tobankii sano mar kaddib tirakoobka dadweynaha. Sida xildhibaanada aqalka sare, waxay soo jeediyaan, ka doodaan, oo u codeeyaan sharciyada. Waxay sidoo kale leeyihiin awood ay ku bilaabaan dacwad xil-ka-qaadis oo ka dhan ah saraakiisha federaalka. Waxay xilka hayaan muddo laba sano ah. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Xafisyada dowladda gobolka

Barasaab: Waa madaxa fulinta ee dowladda gobolka. Wuxuu magacaabaa madaxda waaxyaha iyo hay'adaha dowladda, wuxuu soo jeediya miisaaniyadda gobolka, wuxuuna saxiixaa (ansixiyaa) ama diidaa (kahor imaadaa) sharciyada uu ansixiy golaha sharci-dejintu. Wuxuu sidoo kale magacaabaa garsoorayaal si ay u buuxiyaan jagooyinka bannaan, wuxuu bixiyaa cafis iyo dib-u-dhigis ciqaabeed, wuxuuna u soo celin karaa xuquuqda dadka dambiyada lagu xukumay marka sharcigu oggolaado. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Ku xigeenka barasaabka: Wuxuu la wareegaa waajibaadka barasaabka marka uu maqan yahay ama haddii xilku bannaanaado. Wuxuu sidoo kale qabtaa hawlaha kale ee uu u xilsaaro barasaabka. Barasaab ku-xigeenku wuxuu la tartamaa barasaabka isagoo kula jira tigidhka doorashada, sidaas darteed hal cod ayaad ugu codaynaysaa labadoodaba. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*


Xoghayaha gobolka: Waa masuulka ugu sarreeya maamulka doorashooyinka gobolka wuxuuna kormeeraa hirgelinta sharciyada doorashada iyo tababarka shaqaalaha doorashooyinka ee degmooyinka. Waxa kale oo uu xaqiijiyaa dukumeentiyada rasmiga ah ee gobolka, diiwaangeliyaa ganacsiyada iyo ururrada aan macaash doonka ahayn. Sidoo kale, wuxuu maamulaa barnaamijka Safe at Home. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Hantidhawrka gobolka: Wuxuu kormeeraa sida ay dawladda hoose u isticmaalaan lacagta dadweynaha, wuxuuna sameeyaa hanti-dhawrka warbixinnadooda maaliyadeed. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Xeer ilaaliyaha guud: Wuxuu dowladda gobolka siiyaa adeegyo sharci, wuxuu gobolka u matalaa dacwadaha maxkamadaha, wuxuu dhaqangeliyaa sharciyada khuseeya hay'adaha samafalka, wuxuuna ilaaliyaa xuquuqda dadweynaha. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Xildhibaanka golaha guurtida gobolka: Golaha guurtida gobolka waa aqalka sare ee golaha sharci-dejinta gobolka. Xildhibaanadu waxay soo jeediyaan, ka doodaan, oo u codeeyaan hindise-sharciyeedyada. Waxay ka qayb qaataan diyaarinta iyo ansixinta miisaaniyadda gobolka. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*

Wakiillada gobolka: Aqalka wakiillada gobolka waa aqalka hoose ee golaha sharci-dejinta gobolka. Wakiilladu waxay soo jeediyaan, ka doodaan, oo u codeeyaan hindise-sharciyeedyada. Waxay ka qayb qaataan diyaarinta iyo ansixinta miisaaniyadda gobolka. *Xil Xisbiyo Lagu Tartamo*



Xafisyada degmo

Guddoomiyaha guddiga degmada: Wuxuu ansixiyaa miisaaniyadda sanadlaha ah ee degmada, wuxuu go'aamiyaa heerka canshuurta degmada, wuxuu magacaabaa maamulaha degmada, wuxuuna ansixiyaa xeerarka shaqaalaha. Waxa kale oo uu ka shaqeeyaa qorshaynta muddada fog iyo horumarinta mashaariicda waaweyn ee degmada, wuxuu oggolaadaa isticmaalka deeqaha ay bixiyaan dowlad-goboleedka iyo dowladda federaalku, wuxuu meel mariyaa xeerarka degmada, wuxuuna buuxiyaa jagooyinka bannaan ee xeer-ilaalinta degmada iyo Sheriff-ka degmada haddii ay bannaanaadaan ka hor dhammaadka muddo-xileedkooda. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Sheriff-ka degmada: Wuxuu fuliyaa dhammaan amarada, qoraallada sharciyeed, awaamiirta iyo go'aannada ay soo saaraan hay'adaha sharci ahaan awoodda u leh. Sheriff-ka degmada wuxuu baaraa shilalka gaadiidka madadaalada ee sababa dhaawac ama dhimasho, haddii ay ka dhacaan meel ka baxsan xuduudaha dawladaha hoose. Waxa kale oo uu gaarsiiyaa dhammaan waraaqaha iyo ogeysiisyada sharcigu farayo in la gaarsiyo ama la dhejiyo isagoo matalaya gobolka ama degmada, wuxuuna mas'uul ka yahay maamulka iyo ilaalinta xabsiga degmada *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Xeer-ilaaliyaha degmada: Wuxuu degmada siiyaa adeegyo sharci. Wuxuu dacwad ku soo oogaa dambiyada culus iyo dhammaan kiisaska la xiriira carruurta iyo dhallinyarada dambiyada gasha, wuxuu kormeeraa barnaamijyada lagu weeciyi dhallinyarada dembiilayaasha ah si ay uga fogaadaan nidaamka maxkamadaha, wuxuuna taageeraa dhibbanayaasha iyo markhaatiyaasha oo door muhiim ah ka qaata nidaamka caddaaladda dembiyada. Xeer-ilaaliyaha degmadu wuxuu dhibbanayaasha ku wargeliyaa xuquuqdooda sharci iyo halka uu marayo kiiskoodu, waxa kale oo uu bilaabaa tallaabooyin sharci oo lagu ilaalinayo caafimaadka iyo badqabka dadka waaweyn ee nugul ee ku nool degmada, wuxuuna qaadaa ama hirgeliyaa dacwooyinka la xiriira helidda ama dhaqangelinta masruufka carruurta. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Xubin ka tirsan guddiga maamulka Beeraha Nasashada Degmada: Guddiga maamulka Three Rivers Park District wuxuu ka kooban yahay toddoba xubnood. Shan xubnood waxaa laga soo doortaa degmooyinka ku yaalla duleedka Hennepin County, halka labada xubnood ee kale uu magacaabo Guddiga Guddoomiyeyaasha Hennepin County. Guddiga maamulka beeraha dadweynaha

waxay masuul ka yihiin helitaanka, horumarinta, iyo dayactirka jardiinooyinka waaweyn, deegaannada lagu ilaaliyo duurjoogta, goobaha taariikhiga ah, kaymaha iyo dhulka kale ee la ilaaliyo. Sidoo kale, waxay hubiyaan in dadweynuhu si fudud u heli karaan harooyinka, webiyada, durdurrada, iyo goobaha kale ee dabiiciga ah, si ay uga faa'iidaystaan una isticmaalaan dadka deggan xaafadaha ku hareeraysan Hennepin County iyo guud ahaan deegaanka magaalo-weynta. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Xafisyada dawlada hoose

Duqa magaalada: Duqa magaaladu badanaa waa madaxa fulinta ee dawlada hoose (*inkasta oo ay tani ku kala duwanaa karaan dawlada hoose*). Wuxuu inta badan magacaabaa masuuliyiinta xafiisyada dawlada hoose, wuxuuna guddoomiyaa kulamada golaha dawlada hoose. Duqa magaaladu sidoo kale wuxuu door weyn ku leeyahay diyaarinta miisaaniyadda dawlada hoose, wuxuuna diidi karaa xeerarka ama qaraarrada uu soo jeediyo golaha. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Golaha deegaanka: Xubnaha golaha deegaanku waxay caadi ahaan yihiin waaxda sharci-dejinta ee dowladda hoose (*inkasta oo ay tani ku kala duwanaa karaan dawlada hoose, maadaama ay sidoo kale yeelan karaan awoodo fulineed*). Waxay soo jeedin karaan xeerar iyo qaraarro, dejin karaan siyaasadaha maamulka, isla markaana ansixin karaan miisaaniyadda uu soo jeediyo duqa magaalada. Inta badan, magacaabista uu sameeyo duqa magaalada ee xilalka dowladda hoose waxay u baahan tahay oggolaanshaha golaha deegaanka. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*

Dugsiyada degmada

Xubinta guddida dugsiga: Wuxuu dejinayaa siyaasadaha dugsiyada, wuxuu shaqaaleysiiyaa agaasimaha guud ee Waxbarashada si uu u hoggaamiyo dhinaca waxbarashada ee degmada, wuxuuna go'aamiyaa canshuuraha ama lacagaha degmada lagu maalgeliyo adeegyada waxbarashada. *Aan xisbi siyaasadeed gaar ah raacsanayn*



Inaad noqotid codbixiye xog-ogaal ah

Halkan waxaa ku qoran ilo kaa caawin kara inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan musharraxiinta, xilalka doorashada lagu tartamayo, ama su'aalaha ku qoran warqadda codbixinta:

- Booqo mnvotes.gov si aad u hesho macluumaadka lagala xiriirayo musharraxiinta oo ay ku jiraan websayda, cinwaannada iimaylkooda, iyo lambarrada taleefannadooda. Waxaad musharraxiinta weydiin kartaa su'aalaha ku saabsan arrimaha adiga muhiimka kuu ah
- Waxa kale oo aad barta mnvotes.gov ka heli kartaa macluumaadka lagala xiriirayo xisbiyada waaweyn iyo kuwa yaryar ee siyaasadda ee gobolka Minnesota
- Websaydka iyo baraha bulshada ee musharraxiinta
- Khudbadaha iyo doodaha musharraxiinta
- Warbixinnada saxaafadda ee laga baahiyo wargeysyada, telefishinnada, iyo idaacadaha
- Diiwaanka codbixinta musharraxa (*haddii uu mar kale isu soo sharraxayo xilka*)
- Taageerada rasmiga ah ee musharraxiinta (*taas oo ah marka shakhsiyaad ama ururro si cad u muujiyaan taageeradooda musharrax*)
- League of Women Voters: lwvmn.org
- Ballotpedia: [Ballotpedia.org](https://ballotpedia.org)
- Xafiisyada degmada: Booqo barta hennepincounty.gov si aad u eegto go'aannada golaha degmada iyo macluumaadka ku saabsan kulamadooda.
- Xafiisyada dawlada hoose: Booqo websaydka dawlada hoose si aad u eegto macluumaadka laga heli karo kulamadooda
- Guddida dugsiga: Booqo websaydka dugsiga degmada si aad u eegto macluumaadka laga heli karo kulamadooda





Sida loo calaamadeeyo warqadda codbixinta

Marka aad hesho warqaddaada codbixinta, waxaa la joogaa waqtigii aad buuxin lahayd.

Calaamadeeyo warqadda codbixinta

Ku codeynta adigoo isticmaalaya warqad codbixin iyo qalin waa habka ugu badan ee codbixinta.

- Ku codee adigoo isticmaalaya qalin, kuna buuxi gebi ahaanba goobada ku taalla dhinaca cid kasta oo aad dooranayso.



Calaamadeynta Warqadda Codbixinta iyadoo la Adeegsanayo Qalabka Calaamadaynta Warqadda Codbixinta

- Codbixiyayaashu waxay dooran karaan inay isticmaalaan qalabka calaamadeeya warqadda codbixinta.
- Qalabkan wuxuu leeyahay adeegyo kala duwan oo fududeeya calaamadaynta warqadda codbixinta, sida qoraal waaweyn, tilmaamo cod ah, keyboodhka dadka indhoolaha ah, ama shaashad la taaban karo. Marka aad calaamadeyso warqadda codbixinta, qalabku wuxuu daabici doonaa warqaddaada codbixinta.

Xusuusnow:

- Codkaagu waa sir, waxaadna xaq u leedahay in asturnaantaada la ilaaliyo
- Waxaad la iman kartaa qof kaa caawiya codbixinta ama waxaad caawimo ka codsan kartaa garsoore doorasho
- Haddii aad khalad samayso, ha ka shakinin inaad sarkaalka doorashada ka codsato warqad codbixin oo cusub





Ka qaybqaado

Ka-qaybgalka arrimaha bulshada kuma eka goobta codbixinta! Waxaa jira siyaabo badan oo aad sannadka oo dhan uga qaybqaadan karto arrimaha bulshada iyo dimuqraadiyadda. Marka laga soo tago codbixinta, waxaad ka qaybqaadan kartaa adigoo:

- Noqda garsoore doorasho ama garsoore doorasho oo arday ah
- Ka caawiya dadka kale ee bulshadaada isdiiwaangelinta codbixinta iyo helitaanka goobta ay codkooda ka dhiibanayaan
- Ka qaybqaata olole doorasho
- Ogaada cidda matasha bulshadaada ee xilalka loo doortay, lana xiriira. Waxay halkan u joogaan inay kuu adeegaan!
- Ka mid noqda guddiyada ama guddiyada la-talinta ee magaaladaada
- Ka qayb gala shirarka magaalada iyo degmada
- Ku biira ururka xaafadda aad deggan tahay
- Iskaa wax ugu qabta urur ama xisbi siyaasadeed oo ka shaqeeya arrimaha aad danaynayso
- U tartama xil doorasho!
- Nagala soco Facebook @HennepinElections, X @HC_Elections, ama barta beheardhennepin.org/your-vote-your-voice
- Ugu dambayn, la wadaag hagahan asxaabtaada, qoyskaaga, iyo deriskaaga!

Hennepin County Elections

hc.vote@hennepin.us

612-348-5151

hennepincounty.gov/elections

